# Farriin Ku Saabsan Mudaharaadka Cimilada Adduunka ee Sebtember 20

Qoysaska Sharafta leh ee PPS,

Bisha **Sebtembar 20, 2019**, waxaanu fileynaa in tiro badan ee ardayda dugsiyada PPS ay ku biiri doonaan dad kale oo yaryar ee ku sugan aduunka dacaladiisa si ay uga qeyb qaataan Mudahaaraadka Cimilada Aduunka. Ardayda ayaa qorsheynaya inay ka baxaan fasalka oo u dhaqaaqaan Portland City Hall qiyaastii 10:30 aroornimo, ka dibna u gudbaan Bandhiga Cimilada Cimilada ee OMSI ee Koonfur-bari Portland qiyaastii duhurkii si loogu qabto munaasabad waxbarasho cimilada iyadoo munaasabadaha loo qorsheeyay inay soo gabagabeeyaan 5:00 pm.

**MUHIIM:** Ayadoo la raacayo sharciga Oregon iyo xeerarka degmada, waxaan soo jeedineynaa ardayda inay la sameystaan macalimiintooda ama maamulayaasha qorshe si wax looga qabto wixii shaqo dugsi ah ee la waayey (oo ay ku jiraan imtixaannada). **Dhammaan ardayda dugsiga sare iyo dugsiga dhexe ee ka taga dugsiga 20-ka Sebtembar ee aada Bannaanbaxa Cimilada Aduunka waxaa la siin doonaa fasax cudur-daar leh haddii ay horay ugu sii diyaariyaan maqnaanshaha macallinkooda / macallimiinta oo ay ogeysiiyaan shaqaalaha markay baxayaan.** In kasta oo go'aankani isbadali karo markii aan u sii dhowaanno munaasabada, hadda qorsheyn mayno in shaqaaluhu raacaan ardayda baxeysa Sebtember 20. **Mar hadii ardaydu ay ka baxaan isguulada, ma hubin karno meesha ay ku sugan yihiin ama amaankooda.**

**Fadlan kala hadal ardaygaaga munaasabadani. Mar haddii ay ardaydu ka baxaan xeradeena oo ay aadaan xaflad aanan anagu wakiil ka ahayn/maalgelinin, Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland ma damaanad qaadi karaan nabadgelyadooda. Waxaan kaa codsaneynaa inaad fadlan kala munaaqashoodo qoyskaaga ardaygaaga wixii ku saabsan ka qeybgalkooda, nabadgelyadooda, iyo xiriirintaada haddii ay dugsiga ka baxaan maalinta.**

PPS ma kafaala qaadayso munaasabadani, laakiin waxaan ogsoonahay xuquuqda dastuuriga ah ee ardayda ee xoriyada hadalka. Waxaan sidoo kale aqoonsannahay:

- Dhacdadan oo aay hogaaminayaan ardaydu waxay ku lug leedahay fursado waxbarasho oo la jaanqaadaysa qaabka Golaha Waxbarashada PPS ee loo ansaxiyay Xallinta Cadaaladda Cimilada # 5272.
- Himilada degmadeenna, *PPS dib ayaa loo tababaray*, waxaa ka mid ah sawir qalin jabiya oo sharraxaya waxyaabaha laga filayo koritaanka ardayga fahamkooda ee sinnaanta jinsiyada iyo arrimaha caddaaladda cimilada. Waxaan aaminsanahay in ficilkan ardaydeenu ay tusaale cad u yihiin waxbarashada iyo u doodista aan u rajeynayno dhammaan ardaydeena.
- Mawduucani wuxuu la jaan qaadayaa labadaba siyaasadaha degmada iyo manhajka aasaasiga ah.

Tilmaanta soo socota ayaa la siiyay shaqaalaha PPS:

<u>Loogu talagalay Ardayda Fasalada Dhexe iyo Sare</u>

Ayadoo la raacayo sharciga Oregon iyo xeerarka degmada, waxaan soo jeedineynaa ardayda inay la sameystaan macalimiintooda ama maamulayaasha qorshe si wax looga qabto wixii shaqo dugsi ah ee dhaafa (oo ay ku jiraan imtixaannada).

*Ardayda Ciyaartoyda ah*: Intaa waxaa sii dheer, ciyaartooyda ardayda doorta inay ka qeybqaataan howlaha Sebtember 20 waa inay la xiriiraan macalimiinta ka hor intaysan ka qeybgalin banaan baxa si ay ugala hadlaan shaqada ka baaqatay oo ay leeyihiin waalid / ilaaliye ama ardayga **sii ogeysiiyo agaasimaha isboortiga ee dugsiga inay ka qeybqaadanayaan shaqo joojinta**. Haddii talaabooyinkan la qaado, ardayda ciyaartooyda waxay u qalmi doonaan inay ka ciyaaraan ciyaaraha ama falal galabnimadii / fiidka.

Waxaan sidoo kale ku dhiirigelineynaa barayaasha dugsiga dhexe iyo sare inay u adeegsadaan aaladaha loogu talagalay waxbarashada akhris-qorista cimilada casharadooda todobaadka soo socda si looga caawiyo ardayda inay si adag uga fikiraan sayniska iyo cilmiga bulshada ka dambeysa mowduucan muhiimka ah.

<u>Ardayda K-5 yo Ardayda Dugsiga Hoose</u>
Sebtember 20, waxaan ku dhiirigelinaa barayaasha Xanaanada ka- hor ilaa fasalka shanaad inay ka qeybgalaan howlo dugsiga dhaxdiisa ah oo looga hadlaayo wacyi-gelinta isbedelka cimilaga. Tan waxaa ka mid noqon kara xarakaadyo badan oo nashaadaad waxbarasho oo ku saabsan mowduucaan muhiimka ah sida: kulannada ballaaran ee dugsiga, baaritaanka filimka, aqrinta iyo casharrada la xiriira.

Waaliddiinta ardayda dhigata fasallada K-5 waxay xaq uleeyihiin in ee ay ku cudurdaaran karaan ardayda dugsiga. Haddii ardaydu go'aansadaan inay ka qaybqaataan dhacdooyinka Cimilada Caalamiga ah ee ka dhacaya City Hall iyo OMSI, waalidku waa in uu kaxeeyaa cunuga. Borotokoolka degmada ee caadiga ah ee soo-qaadashada dugsiga ka dib wuxuu khuseen doonaa ardayda K-5, in kasta oo waalidku u oggolaan karaan qaban-qaabooyin kale.

Dhamaan heerarka fasalada, waxaan sameyn doonaa inta karaankeena ah si aan u taageerno iskuuladeena, daba galida cida ka tagaysa iskuulka, iyo kormeerida howlaha kooxaha ardayda doorta inay ka baxaan dhismaha si aay u aadan Bannaanbaxa cimilada. **Mar haddii ardaydu ay ka baxaan iskuulada, ma hubin karno meesha ay ku sugan yihiin ama amaankooda. Fadlan la xiriir maamulahaaga wixii su'aalo ama walaac ah.**

Mahadsanid,

Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland